

BADBAADADA WAXYAABAHAA MAQAARKA SOO SAARA

Xaqiiqooyinka Maqaarka!

Waxa Aad U Baahan Tahay Inaad Ka Ogaato
ALAABKAIFTIIMIYO MAQAARKA



Xaashida Xaqiiqda

Alaabka iftiiminta maqaarka oo ay ku jiraan maaddooyinka hydroquinone ama meerkuridu waxay keeni karaan waxyelo. libinta alaabtan waa sharci darro gudaha U.S. Akhri calaamadaha alaabta maqaarka si aad u aqoonsato maaddooyinka oo kala tasho bixiyaha xanaanada caafimaadkaaga fursadaha daawaynta.

Xafiiska Dadka laga tirada badan yahay ee Caafimaadka iyo Sinnaanta Caafimaadka

Maxay yihiin alaabta iftiimiso maqaarka?

Badeecadaha iftiiminta maqaarka waxa loo suuq geeyaa daawaynta midabka maqaarka oo aan sinnayn, finanka, baro da'da, nabarka cas, iyo laalaabyada. Shirkaduhu wixa laga yaabaa inay ku tilmaamaan alaabta iftiiminta maqaarka inay yihiin maqaar badal, libdhaysa, qeybiso, dhalaalid, ama alaabta casseynta.

Alaabooynikan waxaa badanaa lagu iibiyaa qaab kiriimyo, kareemyo, saabuun, iyo budo ah dukaamada lagu iibyo Hisbaanik/ Laatiino, Aasiyaan, Afrikaan ama Bulshada Bariga Dhexe.

Waa maxay hydroquinone iyo meerkuri?

Hydroquinone iyo mercury waa maaddooyin lagu doro waxyaabaha maqaarka iftiimiya si loo xaddido soosaarka maqaarka ee melanin. Melanin waa dhacaanka ka masuulka ah midabka maqaarka. Markaad marsitid alabka maqaarka oo leh hydroquinone ama meerkuri, jidhkaagu wuu nuugaya maaddooyinkan. Isticmaalka joogtada ah, hydroquinone iyo mercury ayaa ku dhismi kara jidhkaaga, taas oo keeni karta waxyelo.



FDA waxay heshay warbixino ku saabsan waxyellooyin halis ah oo ka yimid isticmaalka hydroquinone, oo ay ku jiraan finanka, bararka wejiga, iyo midabka maqaar badal joogta ah (chronosis). Mercury waa bir aad sun u ah oo dhaawici karta habdhiska dareenka, dheefsiidka, iyo difaaca jirka, iyo sidoo kale sambabada, kelyaha, maqaarka, iyo indhaha.

FDA miyay nidaamisaa iibinta alaabta iftiiminta maqaarka ee leh hydroquinone ama meerkuri?

Alaabta iftiimisa maqaarka ee ay ku jirto hydroquinone looma ogola iibka tooska ah. Si kastaba ha ahaatee, waxaad ka heli kartaa bixiyaha xanaanada caafimaadkaaga daawo maqaarka laguu qoray oo ay ku jirto hydroquinone. U isticmaalka meerkuriga alaabada iftiiminta maqaarka waa mamnuuc.

Sideen ku ogaan karaa alaabta iftiiminta maqaarka ee ay ku jiraan hydroquinone ama meerkuri?

Markaad iibsanyaso alaabta maqaarka iftiimisa, hubi calaamadda alaabta si aad u aragto inay ku jirto hydroquinone ama meerkuri. Si toos ah ha u iibsanyin alaabada maqaarka iftiimisa oo ay ku jiraan maaddooyinkan. Ogsoonow in meerkurigu loo qori karo **mercurous chloride, calomel, mercuric, mercurio**, ama **Hg**.

Maxaa kale oo aan tixgelinaya marka aan iibsanyo alaabta maqaarka iftiinaya sida tooska ah?

Qaar ka mid ah alaabada maqaarka iftiimiso ee sharci darrada ah oo ay ku jiraan hydroquinone ama meerkuri ayaa laga yaabaa inaysan ku qorin maaddooyinkan calaamadda. Ka fogow badeecoyinka leh summadaha gacanta lagu sameeyo, sumadaha ku qoran luqadaha aan Ingiriisi ahayn, ama haba yaraatee aan lahayn calaamad. Badeecoyinka kuwan oo kale ah waxay jebinayaan xeerarka FDA waxaana laga yaabaa inay waxyelo keenaan.

Xagee wax badan ka baran karaa?

Hel Xaqiiqooyinka Maqaarka! ku saabsan badbaadada alaabta maqaarka adoo booqanaya www.fda.gov/SkinFacts.

Haddii aad dareen-celin xun kala kulanto isticmaalka alaabta maqaarka, fadlan la xidhiidh bixiyaha xanaanada caafimaadkaaga. Ka wargeli FDA halkan www.fda.gov/medwatch/report.htm ama adigoo wacaya **1-800-FDA-1088**.

Wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan sinnaanta caafimaadka, booqo www.fda.gov/healthequity.